Kala duwanaanshaha Ugu muhiimsan ee u dhaxeeyo Family Care (Daryeelka Qoyska), Partnership (Iskaashiga) iyo PACE

Dukumentiga soo socda wuxuu sharaxdaa sadex kala duwanaansho ugu muhiimsan ee u dhaxeeyo Barnaamijyada Family Care (Daryeelka Qoyska), Partnership (Iskaashiga) iyo PACE. Kuwaan waa qeybaha guud ee adeegyada lagu daraa faa'iidada (adeegyada daryeelka muddada dheer iyo adeegyada daryeelka caafimaadka), isdhexgalka kooxda isku dhafan, iyo adeegyada gaarka ah ee ku daboolan shabakada bixiyaha.

Isdhexgalka Adeega

Family Care

Isdhexgalka Qeyb ahaanta. Barnaamijka Family Care wuxuu isku daraa guriga iyo adeegyada bulshada ku saleysan, daryeelka machadka (sida daryeelka xanaanada guriga), daryeelka shaqsiga Medicaid, caafimaadka guriga, iyo adeegyada kale ee bulshada ku saleysan ee horay si gooni ah loo maalgeliyay. Family Care MA bixiyaan qarashaadka daryeelka caafimaad (daran/daryeelka koowaad) sida joogitaanada isbitaalka, booqashooyinka qolka degdega, daawooyinka, iyo booqashooyinka dhaqtarka. Ka qeybqaatayaasha Family Care waxay isticmaalaan Medicare iyo Medicaid si loo iibsado adeegyadaan daryeelka caafimaad.

Partnership iyo PACE

Isdhexgalka Buuxo. Barnaamijyada Partnership iyo PACE waxay isku daraan adeegyada daryeelka muddada dheer ee qofka **iyo** adeegyada caafimaadka iyo daawada (daryeelka koowaad iyo daran), **iyo** daawooyinka qoraalka. Sidaas darteed, dhammaan adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan, daryeelka machadka (sida guriga xanaanada), adeegyada dhaqtarka, joogitaanada isbitaalka, daawooyinka, adeegyada ilkaha iyo dhammaan daryeelka kale waxaa la dhaxgeliyaa faa'iidada Partnership iyo PACE.

Isdhexgalka Kooxda Isku dhafan

Family Care

Ugu badnaan, kooxda xiriiriyaha adeega waxaa ku jiro kalkaaliso diiwaangashan, shaqaalaha bulshada, iyo xubinta. Xubnaha waxay dooran karaan inay ku daraan xubnaha qoyska, dadka la jecelyahay, iyo xirfadlayaasha kale si ay uga qeybqaataan kooxdooda.

Partnership iyo PACE

Partnership ugu badnaan, kooxda xiriiriyaha adeega waxaa ku jiro kalkaaliso dhaqtar ah, kalkaaliso diiwaangashan, shaqaalaha bulshada, xubinta, iyo dhaqtarka. Xubnaha waxay dooran karaan inay ku daraan xubnaha qoyska, dadka la jecelyahay, iyo xirfadlayaasha kale si ay uga qeybqaataan kooxdooda.

Gudaha PACE, kooxda xiriiriyaha adeega waxaa ku jiro kalkaaliso diiwaangashan, maamulaha daryeelka, xiriiriyaha xarunta PACE, xiriiriyaha daryeelka guriga, PACE ama dhaqtarka bulshada, daaweeyaha (shaqada, jirka iyo madadaalada) iyo qubaraha cuntada. Xubnaha waxay dooran karaan inay ku daraan xubnaha qoyska, dadka la jecelyahay, iyo xirfadlayaasha kale si ay uga qeybqaataan kooxdooda.

Adeegyada Daboolan iyo Shabakada Bixiyaha

Family Care

Adeegyada Daryeelka Muddada Dheer. Adeegyada daryeelka muddada dheer ee qofka waxay ku daboolanyihiin Family Care. (Fiiri "Adeegyada Daboolan" (Covered Services) kala sheekeyso macluumaadka dheeraad ah.)

Adeegyada Daryeelka Koowaad (oo ay ku jiraan xaaladaha daran iyo raaga). Family Care ma bixiso adeegyada daryeelka koowaad. Xubnaha waxay isticmaalaan dhakhtarkooda gaarka ah oo waxay isticmaalaan kaarkooda Medicaid Forward si ay isaga bixiyaan adeegyada daryeelkooda koowaad. Xubnaha waxay ka helaan daawooyinka la qoray dhinaca Medicare-kooda (Part D) iyo/ama caymiska Medicaid. Kooxda isku dhafan waxay caawin karaan shaqsiga ee isgaarsiinta ee ay la jirto xiriirinta bixiyayaasha daryeelka koowaaad iyo adeegyada.

Partnership iyo PACE

Adeegyada Daryeelka Muddada Dheer. Adeegyada daryeelka muddada dheer ee qofka waxay ku daboolanyihiin Partnership iyo PACE. (Fiiri "Adeegyada Daboolan" kala sheekeyso macluumaadka dheeraad ah.)

Adeegyada Daryeelka Koowaad (oo ay ku jiraan adeegyada xaaladaha daran iyo raaga) waxaa lagu daray faa'iidada Partnership iyo PACE ee ay maamulayaan kooxda daryeelka oo ay la jiraan adeegyada daryeelka muddada dheer. Partnership xubnaha waxay isticmaalaan dhaqaatiirta ee ku jiraa shabakada bixiyaha MCO ee laga yaabo inay ku jirto dhaqtarka xubnaha hadeer. Gudaha PACE, xubnaha waxay isticmaalaan dhaqaatiir ee u shaqeeya MCO ama qandaraas kula jiro. Haddii dhaqtarkaaga uusan qeyb ka aheyn shabakada bixiyaha MCO, MCO waxay kala soo xiriiri karaan dhaqtarkaaga wax ku saabsan ku biirista shabakada bixiyaha. Xubnaha waxay ka helaan daawooyinka qoran dhinaca Partnership iyo PACE. Kuwa ku soo biiro barnaamijka Partnership ama PACE ma isticmaalaan SeniorCare ama Medicare walkba bixiyaha Part D, maadaama daboolida daawooyinka ay sidoo kale lagu daro faa'iidada. Shaqsiyaadka doortaa PACE ma bixiyaan lacagta canshuurta ama laga jari karo daawooyinkooda.

Ku caawinayo Dadka inay Doortaan: Su'aalaha ugu Muhiimsan

1. Sidee ayaad ka dareentaa lahaanshaha koox dad ah ee xiriirinta dhammaan adeegyadaada daryeelka muddada dheer iyo adeegyadaada daryeelka caafimaad?
2. Ma leedahay baaritaano badan oo ay la jiraan cudurka raaga ee adag ama xaaladaha? Miyaad heshay inaad aadid isbitaalka dhoor jeer? Ma qaadatay daawooyin badan? Ma leedahay baaritaanada Cudurka Howlgabka Kelyaha? Haddii ay sidaas tahay, uma qalantid inaad iska diiwaangelisid Partnership, illaa aad iska diiwaangelineysid Ururada Daryeelka La maamulo (Managed Care Organization, MCO) ee haysati ka dhaafida faderaal ahaan loogu ansixiyay sharcigaan. Kaliya MCO, Community Care Inc., waxay leedahay ka dhaafida faderaal ahaan la ansixiyay ee laga diiwaangelinayo shaqsiyaadka qaba Cudurka Howlgabka Kelyaha waqtigaan. Fiiro gaar ah: Shaqsiyaadka qabaa cudurka Howlgabka Kelyaha waxay iska diiwaangelin karaan PACE.
3. Haddii aad xiiseyneyso Partnership, miyuu dhaqtarkaaga qeyb ka yahay shabakada bixiyaha? Haddii aysan aheyn, waxaad la xiriiri kartaa MCO si aad u aragtid haddii ay suurtogal u tahay dhaqtarkaaga inuu ku biiro shabakada. Haddii aysan aheyn, miyay ku quseysaa adiga? Haddii aad xiiseyneysid PACE, miyuu dhaqtarkaaga u shaqeeyaa PACE ama mid ka mid ah dhaqaatiirta bulshadooda? Haddii aysan aheyn, miyaad xiiseyneysaa?
4. Haddii aad ka qeybqaadatid barnaamij gaar ah, isbitaalkee ayaa kuu suurtogaleyso inaad isticmaashid? Ma dooran kartaa midkaaga gaarka ah? Miyay ku quseysaa adiga?
5. Haddii aad xiiseyneysid Partnership ama PACE, miyay daawooyinkaaga ku jiraan qoraal rasmiga ah? Haddii aysan aheyn, waxaa la barbardhigi karaa (guud ahaan) daawada la heli karo? Sidee ayay Partnership MCO ee deegaanka ama PACE u hubiyaan inaad heshid daawooyinka aad u baahantahay?